

UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 22/06/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISO:- FAIZA ALI OSMAN, Somali ah, Hooyo: Faadumo Suufi Amiin, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 01/01/1970, Sidata Refugee Card No. 10133508

LA WAKIISHE:- ABDIQADIR HASSAN MOHAMED (Shiine), Somali ah Ina Maryan Cismaan Yarow, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 11/04/1987, Sita Somali Passport, Lr. P00809068,

B- Aniga oo ah **FAIZA ALI OSMAN**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **ABDIQADIR HASSAN MOHAMED** una wakiishay qaybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay dhamaan wax allaale iyo wixii hanti ah ay lahayd kana geeriyootay Hooyadeey Marxuumad **FAADUMO SUUFI AMIIN**, kuna Qoran Magaceda Mood & Noolba leh, kuna taala Gobolka Banaadir iyo Gobolada Kale ee dalka, sida guri, dhul banaan, goof, beer, gaadiid, I.W.M. Waxaana si buuxda ugu wakiishay in uu ii Xafidi karo, dayactiri karo, Gadi karo, kireeyn karo, Wareejin karo, dhisi karo, Qareen ii Qaban karo hadii loo baahdo, Xanaaneyn karo, igu matali karo magaceyga dhan kasta la iiga baahdo, iina qaadi karo Qismigeyga dhaxaleyd ee uu nasiibkeyga noqdo, iigana doodi karo maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, iina sameen karo waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna ii saxiixi karo kaalinteyda ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman yahay in uu si buuxda Maxkamaddaha hortooda iiga Doodi karo, insha'allaahu,

Waxaan mar kale sii caddeynaynaa in **ABDIQADIR HASSAN MOHAMED** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Qeyb dhaxaleedkaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **ABDIQADIR HASSAN MOHAMED**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay **FAIZA ALI OSMAN**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

FAIZA ALI OSMAN

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

ABDIQADIR HASSAN MOHAMED

1- WAADI MOHAMUD ABDILLE

2- ELMI ABDULLAHI BARKHADLE

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1637/T.P.N/25, Tr. 22/06/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **FAIZA ALI OSMAN** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **ABDIQADIR HASSAN MOHAMED** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada. Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 24/06/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/qaadir Xasan Maxamed** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1637/T.P.N/25, Tr. 22/06/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	C/qaadir Xasan Maxamed
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixisada Faiso Cali Cismaan
Taariikhda Wakaalada	22/06/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **C/qaadir Xasan Maxamed**, Leh Tel No. **0617974131**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/qaadir Xasan Maxamed
